

# **MARKA AYNU DHAMAANTEEN DIB WAX U WARSHADEYNO AYAYNU DHAMAANTEEN GUULEYSANAYNAA!**

**Markasta oo aad baako  
ama wargeys Aad geyso  
dib u warshadeynta, wax  
waxaa dhaca weyn.**

Furka dhalada ee duugga ah waxaa loo rogi karaa biraha huga baabuurrada. Baakadda oomada ee madhan waxaa tusaale ahaan laga dhigi karaa kartoon biisto oo cusub. Wargeyska shalay waxa uu noqonayaa kii berri. Khayraadka dabiiciga ah ee bay'adda ayaa mar labaad dib loo isticmaalayaa iyada oo tammar badanna la keydinaayo. Marka aynu sidaas oo kale sameyno, ayaynu dhamaanteen gacan ka geysanaynaa in aan abuurno adduun kan kasii wanaagsan oo lagu noolaado.

## **DIB U WARSHADEYN**

Qashinka cuntada dib ayaa loo warshadeeyaa iyada oo laga dhigayo gaas iyo digo bayoloji ahaan loo sameeyay, qashinka soo haraaga ahna waxaa laga dhigaa koronto iyo kululeyn. Dhammaan baakooyinka iyo wargeysyada la soo ururiyey aaya loo qaadaa dib u warshadaynta si ay ugu noqdaan baakooyin cusub ama alaaboojin cusub. Baakooyinka balaastikada ah ayaa waxa tusaale ahaan laga sameeya, Bacaha iyo weelsaha dib u warshadaynta. Dhalooyinka wax lagu shubto iyo waraaqaha wax lagu duubo waxay badanaa noqonayaa baakooyin badan. Gasacyada birta ah waxaa laga dhigi karaa shaagag halka wargeysyada la akhristayna laga dhigi karo warqadaha gacmaha lagu tirtirto ama in laga soo saaro warqado wargeys oo cusub.

## **QOLKA BEY'ADDA IYO GOOBTA DIB U WARSHADEYNTA**

Qashinta cuntada iyo qashinta haraaaga ah waxaa lagu ridaa fuustooyin qashin oo khaas ah oo halka aad deggan tahay ah, sida qolka bey'adda. Haddii aadan geyn karin baakadahaada ama wargeysyadaada halka aad deggantahay waxaad geysaa goobaha dib u warshadeynta ee aan shaqaale joogin. Halkan waxaa yaallo weelal loogu tala galay noocyada kala duwan ee qashinka: bacaha, warqado, biraha iyo dhalooyinka, iyo mararka qaar wargeysyada. Baakadaha waaweyn, aan aanan gakeyn gasacyada qashinka ee halka aad deggantahay waxaad geyn kartaa goobaha dib u warshadeynta ama xarumaha dib u warshadeynta.

## **MACLUUMAAD DHEERAAD AH**

Waxaad [www.sopor.nu](http://www.sopor.nu) ka helaysaa goobta dib u warshadeynta ee kuugu dhow iyadoo aad arki karto marka laga qaadaaayo ee la nadiifinaayo. Halkan waxaad sidoo kale aad ka heli kartaa tilmaamaha sida loogu kala soocaayo, fiidiyeasha ku saabsan dib u warshadaynta, tilmaamo iyo talooyin, iyo macluumaad ku saabsan kala soocidda qashinka.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan qashinka iyo dib u warshadeynta waxaad la xidhiidhi kartaa degmadaada. Waxay kaloo ka jawaabi karaan su'alaha ku saabsan qashinka waaweyn, qudhminta iyo dib isugu habeynta, qashinka korontada ama arrimaha kale ee qashinka.

# KALA SAAR WAX BADAN!

Si aad noogu ogolaato in inta qashinka ah ee ugu badan ee suurtogalka ah dib loogu warshadeeyo, ayaanu ugu baahannahay caawimadaada.

- Ha isku darin qashin kala duwan.
- Qashinka cuntada waxaa lagu ridaa baakad warqadeed khaas u ah oo dadka loo qeybiyo.
- Qashinka haraaga ah waxaa lagu ridayaan bac si fiican loo dhuujiyay.
- Baakadu waa inay gebi ahaan wada madhnaato oo ay qallalnato. Haddii aad haysato baako laga sameeyay waxyaabo ka badan hal shey, waa inaad ugu kala saartid maaddada aad u malaynayo inay ugu miisaanka badan tahay.



QASHINKA CUNTADA

- ✓ Haraaga miraha iyo khudaarta, hayaha caleenta shaaha, qolofka ukunta, laf hilib iyo wixii soo raaca. Wax yar oo warqadaha lagu tirtirto ah waa caadi.
- ✗ Bac, tubaako, sigaar, ubaxyo iyo shumac ma ahan qashin cunto.



BAAKADHA BALAASTI-KADA KA SAMAYSAN

- ✓ Dhalooyinka, daasadaha, bacda balastiga, bacda balastiga dib wax loogu shubto, tuunbooyinka balastiga, baakadaha jibista iyo Buushka/goomada. Ka saar waxkasta oo fur ama dabool ah. Bacdaada ku kala rid noocyada weelka u gaar ah noocyada kala duduwan ee baakooyinka caaga ah. Waxay hadhow dhib yaraynaysaa dib u warshadeenta.
- ✗ Waxyaalaha balastiga ah ee aan ahayn baakooyinka waa in lagu tuuraa meesha qashinka waawey ama ka guriga, tusaale ahaan, qalabka guryaha iyo alcaabta. Quraaradaha la soo celiyo ayaa dukaanka la geynaya si lacag laguugu soo celiyo.



BIRTA WAX LAGU SHUBTO

- ✓ Qasacadaha raashinka, qasacadaha wax lagu buufiyo ee faaruqa ah, tuubooyinka, furarka iyo daboolada, qasacadaha rinjiga. Qalooci furka seefta ee qasaacadaha birta.
- ✗ Daasada uu ku jiro rinjigu ama hadhaaga xabagu waa in la geeyo weelka khashinka khatarta ah. Birta duugga ah, waxyaalaha tuubooyinka biyaha, daawaha wax lagu dubto iyo alaaboooyinka kale ee aan ahayn kuwa wax lagu rito, ayaa la geynaya meesha qashinka waaweyn ama guriga. Daasada la soo celiyo ayaa dukaanka la geynaya si lacag laguugu soo celiyo.



BAAKADHA WARAAQAHKA SAMAYSAN

✓ Baakadaha baastada, karaatoonta caanaha iyo casiirka, kiishashka warqadaha, kartoonka kabaha, kartoonka tuunbada oo kale ah ee xaanshida musquisha, kartoonada. Isku dumi oo laba jee risku laab. Baakadaha yaryar ku dhex rid baakadaha waaweyn si aad ugu keydiso boos.


✗ Baqshadaha waa in loogu kala saaro sida qashinka guriga ama qashinka la gubi karo. Wargeysyada, waraaqaha yaryar ee xayeesiinta iyo wixii la mid ah waxaa la dhexdhigayaa weelka loogu talagalay wargeysyada.



WARGEYSYADA

✓ Wargeysyada maalinlaha iyo todobaadlayaasha ah, joornaalada, kaatalogyada, waraaqaha yaryar ee xayaysiska, buuqaga xusuus qorada iyo waraaqaha qoraalka-/sawiraada. Ka saar bacda balastiga ee ku duuban iyo xaashiyaha xayesiiska ee ku dhagan.

✗ Baqshadaha iyo buugaagta isku tolani waa in loogu kala saaro weelka qashinka guriga ama qashinka la gubi karo. Bacaha warqada ee wax lagu qaado, kartoonada iyo wixii la mid ah waxaa lagu ridayaan weelka baakeedada waraaqaha.



MEELEYNYA DHALOOYINKA BILAA MIDABKA AH

✓ Dhalooyinka midabka leh ama bilaa midabka ah iyo joogaga. Ka fur afka, daboolka iyo furka kadibna kala saar sida alaabtaas looga faa'iideysto. Quraaradaha midabka leh iyo kuwa aan midabka laheyn midwalba gee weelka loogu talo galay.

✗ Quraaradaha la soo celiyo ayaa dukaanka la geynaya si lacag laguugu soo celiyo. Booshiliinka, dhoobada iyo alaaboooyinka kale ee aan ahayn kuwa wax lagu rito, waa in la geeyaa meesha qashinka waaweyn ama guriga. Guluubyada iyo laanbadaha waa in caadi ahaan la geeyo xarunta dib uga faa'iideysiga kamuunka ee shaqaalahu joogo.



QASHINKA HARAAGA AH

✓ Xafaayad, bashqad, marada maacuunta lagu dhaqo, tubaako, burushka ilkaha iyo tinta burushka tinta.

✗ Wax walba oo dib loo warshadeeyo karo ma ahan in lagu rido weelka qashinka ee caadiga ah! Qashinka halista ah iyo qashinka korontada ma ahan in lagu rido weelka qashinka, waxaad geysaa xarunta dib u warshadeenta.

WAAD MAHADSAN TAHAY!

sopor.nu  
Sveriges avfallsportal